



CISP waxaa ay aqoonsan tahay in dagaallada iyo aafuoyinka dabiiciga ahi ay siyaabo kala duwan u saameeyaan haweenka, gabdhaha, wiilasha iyo ragga. Iyada oo dhinacaas ka egeysa, ayaa habka CISP ay u wajahdo wax ka qabashada dhibaataada ee marxaladaha kala duwan ee daraasadeynta, iyo sidoo kale qaabeynta, iyo fulinta barnaamijkeeda uu ka muuqdaa kala-duwanaanshaha dheddig-laboodka. CISP waxaa ay sameysaa lafaguris ku aaddan dheddig-laboodka waxaana ay eegtaa kaalimaha iyo mas'uuliyadaha kala duwan ee qaybaha kala duwan ee dadweynaha, iyada oo dooneysa in ay baahidooda u gaarka ah ay dhexgeliso marka la diyaarinayo iyo marka la hirgelinayo barnaamijka.

Iyada oo ay ujeeddadu tahay in si sinnaan ku dheehan loo gaaro gargaarka, fursadaha iyo ka-qaybgalka haweenka/gabdhaha iyo ragga/wiilasha, CISP waxaa ay arrimaha dheddig-laboodka dhexgelisaa dhammaan waxqabadka mashaariicdeeda iyo waaxaheeda. Ujeeddadan daraaddeed, ayaa CISP ay gudaha dalka uga qabatey tababar cinwaankiisu yahay "Barnaamijyo Tixgeliya Arrimaha Dheddig-laboodka oo laga dhex fuliyo Xaaladaha Degdegga ah".

Sida ay CISP uga go'an tahay wax ka qabashada arrimaha dheddig-laboodka waxaa ay ka muuqataa sida firfircoon ee ay uga qayb qaadato koox-hawleedyada Guddiga Joogtada ah ee Hay'adaha Ka Dhexeysa ee Arrimaha Dheddig-Laboodka (IASC GenNet) iyo Guddiga Wax ka qabashada Rabshadda Ku Dhisn Jinsiga/Dheddig-laboodka (GBV).

Waxbarashada

- ° CISP waxaa ay hab ku xisaabtamaya arrimaha dheddig-laboodka oo ku saleysan ka-qaybgal ay u martaa fahmida culeysyada la xiriira isqorista dugsiyada waxaana ay baartaa sababaha ka dambeeya in dhammaan ardayda lab iyo dheddigba leh ee da'ahoodu ay kala duwan yihiin ay uga baxaan iskuullada.
- ° CISP waxaa ay munaaqashooyin u qabataa kooxo iskujinsi ah si ay uga doodaan caqabadaha wiilasha iyo gabdhaha ka hortaagan dhigashada dugsiyada.
- ° CISP waxaa ay sahay caafi-dhowr oo ku habboon siisaa gabdhaha si ay deegaan u

habboon gabdhaha uga dhex abuurto dugsiyada.

- ° CISP waxaa ay shaqo-qortaa ayna tababartaa macallimiin haween ah si ay haween uga mid noqdaan shaqaalaha iskuullada.



Fayadhowrka iyo Nadaafadda Biyaha (WASH)

- ° CISP waxaa ay marxaladda daraasadda/qiimeynta la sameynayo la tashiyo la sameysaa haweenka/gabdhaha iyo ragga/wiilasha si loo soo helo meelo ammaan ah oo aan halis lahayn oo laga sameeyo ilaha biyaha iyo tas-hiilaadka fayadhowrka (musqulaha).

- ° CISP waxaa ay hubisaa in ilaha biyuhu ay u muuqdaan ayna ku yaallaan meelo 500 mitir u jira degsiimooyinka, si looga hortago halis loo galo rabshad jinsi ku dhisan (kufsi).

- ° CISP waxaa ay tas-hiilaadka fayadhowrka (musqulaha) u qaabeysaa qaab hubinaya asturnaanta iyo ammaanka ragga/wiilasha iyo haweenka/gabdhaha.

Nolol-raadiga/Maciishadda

- ° CISP waxaa ay marka ay diyaarineyso waxqabadyada maciishadda/nolol-raadsiga iyo barnaamijyada lacagaha bixiya tixgelisaa baahiyaha ku gaarka ah dadka nugul (sida qoysaska ay haween u madax tahay, carruurta, iyo xubnaha qabaa'ilka laga tiro badan yahay iyo sidoo kale dadka naafada ah).

Caafimaadka

- ° CISP waxaa ay hubisaa in si simman ay adeegyo caafimaad oo waxtar leh, ammaan ah, oo tayo leh u helaan dhammaan qaybaha kala duwan ee dadweynaha.
- ° CISP waxaa ay hubisaa in shaqaale haween ah la qoro si ay haweenka iyo gabdhaha u arkaan xirfadlayaal caafimaad oo ay isku jinsi yihiin.
- ° CISP waxaa ay hubisaa in la-talinta iyo qoraallada xaaladaha loo sameeyo si asturan oo sir ah.

Xiriirro Faa'iido Leh

1. www.iasc-elearning.org
2. www.gdnonline.org
3. <http://oneresponse.info/crosscutting/gender/Pages/Gender.aspx>